# DAAWEYNTA KORONTADA MASKAXDA LA MARSIIYO EE LAGU DAAWEEYO BUKAANLAYDA LAGU HAAYO ISBITAALKA

(Qaybta 58A ee Xeerka Caafimaadka Maskaxda 1983)

## Muxuu buug-yarahaan ku saabsan yahay?

Buug-yarahaan wuxuu kuu macneynaayaa shuruudaha gaarka ah ee Xeerka Caafimaadka Maskaxda 1983 ee ku saabsan isticmaalida daaweynta korontada maskaxda la marsiiyo (electro-convulsive therapy (ECT)) sidii loogu daaweeyo jirro maskaxeed. Shuruudahaan waxay ku qoran yihiin qaybta 58A ee Xeerka Caafimaadka Maskaxda.

## Waa maxay daaweynta korontada maskaxda la marsiiyo?

ECT waa daaweyn loo isticmaalo dhowr yar oo jirrooyin maskaxeed, sida murugada ama niyad jabka aad u xun, waallida iyo iyo dheex-yaac maskaxeed. Markii la sameynaayo ECT, koronto ayaa waqti gaaban la dhex marin doonaa maskaxda, kuwaaso keeni doono qallal. ECT waxaa la sameeya ka dib markii bukaanka la suuxiyo iyo la siiyo daawo jilcinaayo murqaha sidii looga hortago inay is-dhaawacaan markii uu qallalka qabto. Caadi ahaan, ECT waxaa la sameeya lix ama 12 mar, waxaana sameeyo shaqaale si gaar ah ugu tababaran.

Haddii shaqaalaha isbitaalka u maleeyaan inuu fikrad fiican yahay in lagugu sameeyo ECT, waxay kuu macanyn doonaan wuxuu yahay iyo sababta ay u maleeyaan inuu kuu fiican yahay.

## Miyaan diidi karaa ECT?

Haddii aad go’aan laftigaaga gaari kartid, ma ahan inaad waafiqtid (ogolaato) ECT haddii aadan rabin. Waxaa ECT lagugu samayn doonaa oo kaliya haddii aad waafiqdid in lagugu sameeyo ama uu yahay xaalad deg-deg ah.

## Maxaa dhacaayo haddii aan ka yarahay 18 jir?

Haddii aad ka yar tahay 18 jir iyo ogolaato inaad isticmaasho ECT, takhtar oo ka socon isbitaalka lagugu daaweyo ayaa imaan doono sidii uu kuu arko.

Takhtarkaan madaxbanaanan waxaa lagu magacaaba SOAD (Takhtarka ku Magacaaban inuu Bixiyo Rayi'ga Labaad) waxaana jagada ku magacaabo Guddi madaxbanaan ah ee kormeero sida loo isticmaalo Xeerka Caafimaadka Maskaxda.

Takhtarka madaxbanaanan wuxuu la hadli doonaa adiga iyo shaqalaha isbitaalka ee ku yaqaano.
Waxaa ECT lagu siin doonaa oo kaliya haddii adiga iyo takhtarka madaxbanaanan waafiqdaan, ama uu yahay xaalad deg-deg ah.

## Maxaa dhacaayo haddii shaqaalaha isbitaalka u maleeyaan inaan laftigayga go'aan gaari karin?

Wuxuu rayi'ga shaqaalaha isbitaalka ahaan karaa in jirradaada maskaxeed awgeeda, aadan awoodi kariin inaad go'aan ka gaarto in lagugu sameeyo ECT ama lagugu sameynin.

Kani waxaa loola jeedaa inaadan ogeyn wuxuu ECT yahay, waxa loogu talagalay, iyo waxa ay yihiin waxyeelaytiisa iyo faa'iidadiisa.

Haddii ay u maleeyaan inaadan laftigaaga go'aan gaari karin, shaqaalaha isbitaalka waxay Takhtarkaan madaxbanaanan (SOAD) ka codsan doonaan inuu ku arko. Takhtarka madaxbanaanan wuxuu la hadli doonaa adiga iyo shaqalaha isbitaalka ee ku yaqaano.

Haddii takhtarka madaxbanaanan waafiqo inaadan kaligaaga go'aan gaari karin, wuxuu u fasaxi  karaa shaqaalaha isbitaalka inay kugu sameeyaan ECT. Aysan ahayn markii uu jiro xaalad deg-deg ah, waxaa ECT lagugu sameyn karaa oo kaliya haddii takhtarka madaxbanaanan waafiqo.

Laakin takhtarka madaxbanaanan ma waafiqi karo inuu shaqaalaha isbitaalka siiyo awood ay kugu sameeyaan ECT haddii aad horey u sameysay go'aan si sharci ah u dabakhmaayo ee aad ku diiday in lagugu sameeyo ECT  sida u qabo Xeerka  Awoodda Maskaxda  ee 2005,  ama qof kale ee loo ogol yahay inuu Xeerka go'aan kaaga gaaro sheegay in daaweynta lagu siinin. Kani wuxuu ahaan karaa qof aad siiday awood sharciyeed ee joogto ah, qof Maxkamadda Badbaadada kugu magaacbdey inuu wakiil kaa noqdo,ama Maxkamadda Badbaadada laftigeeda. Shaqaalaha isbitaalka ayaa ku siin karo macluumaad ka badan ee ku saabsan Xeerka Awoodda Maskaxda  2005.

## Maxaa dhacayo markuu uu jiro xaalad deg-deg ah?

Markuu u jiro xaalad deg-deg ah, waxaa lagu siin karaa ECT xittaa haddii adiga ama takhtarka madaxbanaanan ku waafiqin in lagugu sameeyo.

Laakin kaasi waxaa la samayn karaa oo kaliya haddii aad u baahan tahay in ECT isla markiiba lagugu sameeyo sidii loo badbaadiyo noloshaada, ama sidii loo joojiyo in caafimaadkaaga maskaxda sii xumaado.

## Shuruud Dabakhaad

Waxaa jiro Shuruud Dabakhaad oo shaqaalaha isbitaalka ku talinaayo Xeerka Caafimaadka Maskaxda iyo sida loola dhaqmo dadka qabo dhiibato maskaxeed. Waa in shaqaalaha tixgeliyaan waxa uu Shuruudda sheegaayo markii ay go'aan ka gaarayaan xannaanadaada. Waxaad weydiin kartaa inaad aragto nuqulka Shuruudda, haddii aad doonayso.

## Sida cabasho loo sameeyo?

Haddii aad rabto inaad ka cabato wax walba ee xiriir la leh xannaanadaada iyo daaweyntaada isbitaalka, fadlan la hadal xubin ka mid ah shaqaalaha.  Waxay awoodi karaan inay xaaladda xalliyaan. Waxay xittaa ku siin karaan macluumaadka habsocodka cabashada ee isbitaalka, oo aad isticmaali karto sidii aad u xalliso cabashadaada adigoo u maraayo  wax lagu magacaabo xal-helidda deegaanka.  Waxay xittaa kuu sheegi karaan qof walba ee kale ee kugu caawin karo samaynta cabashada.

Haddii aadan u malayn in hab-socodka cabashada ee isbitaalka ku caawin karo, waxaad ka caban kartaa Guddii madaxbanaan. Guddiga wuxuu kormeera sida loo isticmaalo Xeerka Caafimaadka Maskaxda, sidii uu u hubiyo in si sax ah loo isticmaalo, iyo in shaqaalaha si sax ah u xannaaneeyaan bukaanlayda intii ay isbitaalka joogaan. Shaqaalaha isbitaalka waxay ku siin karaan buug-yare kuu macneynaayo sidii loola xiriiro Guddiga.

### Sidii aad u hesho caawinaad iyo macluumaad dheeraad ah

Haddii uu jiro wax aadan ka garan xannaanadaada iyo daaweyntaada, xubin ka mid ah shaqaalaha ayaa isku dayi doono inuu ku caawiyo. Fadlan ka codso xubin ka mid ah shaqaalaha inuu kuu sharraxo haddii uu jiro wax aadan ka garanin buug-yarahaan ama haddii aad qabtid su'aalo oo buug-yarahaan ka jawaabin.

Fadlan weydii haddii aad qof kale u rabto  nuqul kale ee buugyarahaan.